



DISTRICT196
One District. Infinite Possibilities.

Kusoo dhawoow **DUGSIGA BARBAARINTA** **2026**



Deerwood Elementary School

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

Deerwood Elementary School

1480 Deerwood Drive
Eagan, MN 55122

Xafiiska: 651-683-6801
Fakiska: 651-683-6808

Leenka Wicitaanka Soo Xaadiritaanka: Infinite Campus Absence Form
Ka eeg bogga 10 si aad uga hesho macluumaadka soo xaadiritaanka

Tyra Raasch, Maamulaha
651-683-6801 tyra.raasch@district196.org

Ryan Lyrek, Kaaliyaha Maamulaha
651-683-6801
ryan.lyrek@district196.org

Nancy John, Kalkaaliyaha
651-683-6801
nancy.john@district196.org

Webseedka Degmada: www.district196.org • Webseedka Dugsiga: www.district196.org/dw

Saacadaha Xafiiska Dugsiga: 7:00 a.m. - 3:15 p.m.
Saacadaha Macallinka: 7:00 a.m. - 3:00 p.m.
Saacadaha Ardayga: 7:45 a.m. - 2:05 a.m.

Baaritaanka Caafimaadka iyo Korriinka Dhallaanka
Haddii canugaaga aanu soo marin nidaamka baaritaanka, fadlan
ballantaada ku qabso adigoo maraya mid kamid ah siyaabaha soo socda:

Onlaynka: www.district196.org/screening

Taleefan: 651-423-7899

limaylka: ecscreening@district196.org

Degmo Dugsiyeedka 196

Xarunta Adeegga Degmada ee Baaritaanka Caafimaadka
iyo Korriinka Dhallaanka

14301 Diamond Path

Apple Valley, MN 55124

Ma jiro wax kharash ah oo la isaga qaadayo baaritaanka.
Ballamaha baadhitaanada waxa la helayaa maalmaha shaqada
todobaadka, iyo sidoo kale fiidad iyo Sabtiyo la doortay bilkasta.

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta ee Deerwood Elementary School

Tani waa tallaabo xiiso badan u leh carruurta iyo
qoysaskooda labadaba.

Waxaan rajeyneynaa in buug-yarahan uu ka jawaabo
su'aalaha aad qabto iyo inuu kaa siinayo dulmar waxtar
leh waxa aad filan karto.

Waxaad xubin muhiim ah ka tahay waxbarashada
ilmahaaga, waxaanan rajeyneynaa inaan si wadajir ah u
bilowno safarkan xiisaha leh!

Tusmada Mowduucyada

Falsafadda iyo Aragtiyaha WaxbarashadaHore	7
Jadwalka Dugsiga Barbaarinta.....	7
Sidee Ayaan Uga Caawin Karaa Canugeyga Isku Diyaarinta Dugsiga Barbaarinta?	8
Badbaadada Shakhsiyeed – Tagitaanka iyo Ka Imaanshiyaha Dugsiga.....	9
Macluumaadka Caafimaadka	10
Maalinta Caadiga ah ee Dugsiga Barbaarinta	14
Tirooyinka	15
Shaxda Alifbeetada.....	16
32 Ereyada Badanaa Soo Noqnoqda	17

FALSAFADDA WAXBARASHADA HORE

Hadafka waxbarashada hore waa in la kobciyo horumarka carruurta si ay u noqdaan kuwo wax weyddiia, u heellan inay wax bartaan, hal-abuur leh, kalsooni qaba, naxariis badan oo is-dira. Waayo-aragnimada waxbarashada hore waxay fursado siisaa tayooyinkan si ay u horumariyaan oo ay aasaaska ugu dhigaan waxbarashada mustaqbalka. Waxbarashada hore waa in ay taageertaa iskaashiga waxbarashada, isdhexgalka, isku kalsoonaanta caafimaadka qabta iyo hal-abuurka, oo ay sare u qaadaa kobaca xallinta mashaakilaadka, go'aan qaadashada iyo xirfadaha wada-xiriirka.

Barnaamijka waxbarashada hore waxa uu ka kooban yahay waxqabadyo macalinku fududeeyo, oo baraatiko ah oo wax ka qabta baahiyaha iyo danaha gaarka ah ee canugga, iyo sidoo kale qaab-dhismeedyada manhajka. Carruurtu waxay qaataan mas'uuliyad shakhsi ahaaneed oo sii kordheysa iyo madax-bannaani inta ay korayaan oo ay sii kobcayaan.

Isku xirnaanta muhiimka ah ee ka dhexeysa guriga, dugsiga iyo bulshada ayaa lagu qiraa laguna xoojiyaa barnaamijka waxbarashada hore. Qoysaska iyo macalimiinta waxay si iskaashi ah uga shaqeeyaan dhiirigelinta iyo ka taageeridda carruurta safarkooda gaarka ah ee waxbarashada nolosha oo dhan.

ARAGTIYAHA WAXBARASHADA HORE

- Carruurnimada hore waa wakhti cajiib u ah horumarka nafsiyeed, jir ahaaneed, bulsho ahaaneed iyo tacliinta inta dariiqooyin badan oo waxbarasho la dejinaayo.
- Waxbarashadu waa geedi socod bulsho oo carruurtu ay wax ku barato ciyaar, sahmin wax-weydiin, iyo waxbaris cad Khibradaha baraatikada ah waxay kobciyaan hal-abuurnimada iyo mashaakil-xallinta. Waxbarista cad waxay bixisaa hagiis la beegsanayo, taasoo ka caawinayso carruurta inay xirfadaha aasaasiga ah iyo aqoonta ku kobciyaan deegaan qaabaysan, oo taageero leh.
- Qoysasku waa macalinka koowaad uguna saameynta badan ilmaha.
- Canug kasta wuxuu leeyahay awoodo u gaar ah, kuwaasoo u leh faa'ido isla markaana kobciya qoyska, dugsiga iyo bulshada.
- Carruurtu waxay ku kobacdaa deegaan nabdoon oo baahiyahooda lagu daboolo ixtiraam la wadaago, xanaaneyn iyo joogteyn.
- Iskaashiyo qoys, dugsi iyo bulsho oo xoogan ayaa gacan kageysta xaqiijinta guusha canugga ee iskuulka iyo wixii ka danbeeya.

JADWALKA DUGSIGA BARBAARINTA

Agoosto 2026

Macluumaadka gaadiidka ayaa loo dirayaa guryaha qoysaska

Agoosto 24, 2026

Caddeymaha tallaalada ayaa loo geynayaa kalkaaliyaha dugsiga

Agoosto 31, 2026

Maalinta ugu horeysa ee ay imaanayaan dugsiga dhammaan ardayda

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

SIDEE AYAAN UGA CAAWIN KARAA CANUGEYGA ISKU DIYAARINTA DUGSIGA BARBAARINTA?

Waalidiintu waa macalimiinta koobaad uguna muhiimsan carruurtooda. Laga bilaabo maalinti uu canugaagu dhashay, waxaad ku mashquulsaneyd in aad isaga ama iyada barto xirfado, luuqadda iyo fahamka aduunka.

Carruurta waxay ka helayaan waxbarashada waalidiintuna gacan kageysan karaan kobcinta jecleysiinta waxbarashada iyagoo:

- Wadajir wax u akhrinaya, kadibna ka wada-hadlaya sheekada iyo sawirada
- La hadlaya dadka waaweyn iyo carruurta kale (si taxadar leh u dhegeysanaya dadka kale, tookeysanaya hadalka, weydiinaya su'aalo, iwm.)
- Abuuraya sheekooyin, ka hadlaya fikradaha, baahiyaha ama su'aalaha
- Sharrixidda sida ay arrimuhu u shaqeeyaan
- Wadajir u ciyaaraya ciyaaro oo u ciyaaraya iskooda
- Wada heesaya oo wada baranaya heesaha, iyagoo siinaya fursado ay ku helaan dhammaan noocyada muusikada
- Bixinta dheellitirnaanta waqti-ciyaareed habaysan iyo mid aan habaysnayn
- U bandhigidda canugaaga ee goobo cusub, waxyaabo iyo fursado waxbarasho
- Ka caawinta ilmahaaga inay sheegaan baahiyahooda iyo baridda inay caawinaad weydiistaan marka ay u baahanyihiin

Waalidiintu waxay sidoo kale carruurta ka caawin karaan inay dhistaan xirfado wax ku ool ah oo taageera guushadugsiga:

- Barashada sida loo xiro/furo jiinyeerada, badhannada iska dabcinta dharka, guluusyada iyo xargaha kabaha
- Isticmaalka safaleetiga iyo daboolista qufaca iyo hindhisada
- Dhihidda magaca hore iyo kan dambe
- Aqoonsiga magaca qoraalka ah ee farta waaweyn xilliga bilowga iyo inta kale far yaryar
- Isticmaalka qalinka midabeynta, qalin koobiga, qalin qoriga, koollada iyo maqasyada
- Ka caawinta inay sheeyaasha meel dhigaan kadib isticmaalkooda

Waalidiintu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan guusha dugsiga ee ilmahooda. Waxaanu maalin kasta ka codsanaa waalidiinta inay ilmahooda ka caawiyaan isu diyaarinta iskuulka. Waxaad tani ku sameyn kartaa adigoo u fiirsanaya jadwalka dugsiga barbaarinta ee waxqabadyada gaarka ah ama sheeyaasha loo baahan yahay; oo xaqiijinaya in canugaagu si sax ah u lebigtay, uu qaato boorsada dhabarka oo buuxda una degdego iskuulka. Adigoo ku dhiirigelinaya canugaaga inuu si joogto ah u xaadiro iskuulka, waxaad ka caawineysaa inuu yeesho caadooyinka shaqada ee xilkaasnimada ah uuna muujiyo qiimaha waxbarashadu leedahay.

Waxaan ku boorinaa waalidiinta inay soo booqdaan iskuulkeena. Fadlan la xiriir macalinka canugaaga si aad u hesho waqtiyada booqashada/ isxilqaanka. Haddii aad jeclaan lahayd inaad isa soo xilqaanto balse aadan awoodin in aad iskuulka timaado, waxaa sidoo kale jira siyaabo aad guriga ugu caawin karto. Sidoo kale, fadlan la xiriir macalinka canugaaga.

Waxaa jira waqtiyo sanadka dhexdiisa ah oo ay waalidiintu su'aalo ama walaacyo ka qabaan horumarka ilmahooda ama barnaamijka dugsiga barbaarinta. Fadlan xor u noqo in aad wacdo ama la xiriirto macalinka canugaaga wixi walaacyo ama su'aalo ah ee laga yaabo in aad qabto.

Waqti gaar ah u yeel maalinkasta oo ay ilmahaagu kaaga sheekeeyaan maalintooda dugsiga barbaarinta. Canugaaga ku dhiirigeli inuu wax kaaga sheego hawl uu jecel yahay kulana wadaago sheeyaasha uu guriga ku keenay boorsada dhabarka ee iskuulka. Fadlan qaado waqti aad ku akhriso farriimaha iskuulka sida wargeysyada, jadwalada iyo qoraallada kale ee guriga loo soo diro. Kuwani waxay kaa caawinayaan inay xog kaa siiyaan hawlaha ka socda fasalka iyo iskuulka oo dhan.

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

Waxaa muhiim ah in waalidiintu xoojiyaan xirfadaha iyo fikradaha carruurta lagu baro iskuulka. Inaad kor wax ugu akhrido guriga waa qodob muhiim u ah guusha wax akhrinta mustaqbalka ee canugaaga. Jawi taageero ah sii ilmahaaga adigoo ku bogaadinaya dadaalkooda iyo guushooda iskuulka.

Sumadida

Fadlan si cad sumad ugu yeel waxyaabaha uu leeyahay canugaaga, oo ay ku jiraan kabaha buudka, sigsaamaha gacmaha, jaakadaha, koofiyadaha, kabaha iyo alaabaha kale ee shaqsiyeed.

Barnaamijka Adeegga Cuntada Saamarka ee Federaalka

Barnaamijka Adeegga Cuntada Saamarka ee Federaalka wuxuu cunto bilaash ah siiyaa qofkasta oo 18 sano jir ah ama kayar. Si aad u hesho iskuulka ugu dhow ee laga bixiyo adeeggan fadlan booqo <http://www.district196.org/services/food-and-nutrition-services>. Goobaha waxaa bogga webseedka lagu dari doonaa Abriil dhexdeeda.

BADBAADADA SHAKHSIYEED – TAGITAANKA IYO KA IMAANSHIYAHA DUGSIGA

Waxay muhiim u tahay badbaadada ilmahaaga in ay yaqaanaan waxyaabaha soo socda:

- Magacooda, lambarka telefoonka, wadada iyo lambarka guriga
- Ardaydu waa inay kaliya aqbalaan inay gaari la raacaan waalidiinta ama darawalada kale ee uu oggolaaday iskuulka ama waalidka

Haddii ilmahaagu u lugeeyaan iskuulka, fadlan xaqiiji inay garanayaan waxyaabaha soo socdo:

- Meesha ugu ammaansan ee lagu socdo inay tahay dhabbaha dhinaca ee lugeynta
- Sida loo gudbo wadada
- Macnaha calaamadaha taraafigga
- Muhiimadda ay leedahay in wadooyinka laga gooyo oo kaliya dhabbaha loogu talagalay in dadku ay ka gooyaan iyada oo ay kormeerayaan ilaalada goynta wadada ama roondada dugsiga
- Waddada ugu toosan uguna badbaadsan ee loo maro iskuulka
- In aysan istaagin ama booqan meelo aan loogu talagalin inta ay u socdaan ama ka imaanayaan iskuulka

Haddii ilmahaada ay bas u raacaan iskuulka, waa in ay ogaadaan:

- Inay baska sugaan iyagoo ka duruqsan wadada
- Waa inay si taxadar leh ku koraan uguna dagaan baska
- In caawiyayaasha baska iskuulka loo diyaariyay badbaadada, inay ardayda ka caawiyaan inay gooyaan wadada iyo inay kaga dagaan kana raacaan baska isgoysyada mashquulka ah
- Inay toos u aadaan meesha uu istaago baska subixi oo ay toos u soo aadaan guriga kadib marka la keeno dhammaadka maalinta
- Ardaydeena dhigata dugsiga barbaarinta badankooda waxay si nabad ah uga lugeeyaan meesha uu basku istaago iyaga oo aan la kormeerin maalinkasta. Haddii aad doorato in aad kula kulanto ilmahaaga meesha uu basku istaago waa in aad imaadaa shan daqiiqo kahor waqtiga keenista ee la qorsheeyey. Haddii aad si joogta ah kula kulanto ilmahaaga meesha uu basku istaago oo aadna daahdo, fadlan Waaxda Gaadiidka ka wac 651-423-7685.

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA

Caafimaadka wanaagsan ayaa aasaas u ah nolol wanaagsan oo wax soosaar leh. Ujeedada barnaamijka caafimaadka dugsiga waa in lagu joogteeyaa, lagu hagaajiyaa oo kor loogu qaadaa caafimaadka ilmaha jira da'da iskuulka laguna yareeyo caqabadaha ka haysta waxbarashada.

Kalkaaliye dugsiga oo ruqsad haysta (LSN) ayaa la helayaa inta lagu jiro maalinta dugsiga si uu adiga iyo canugaaga uga caawiyo walaacyada iyo su'aalaha la xiriiira caafimaadka. LSN waa kalkaaliye diiwaangashan oo afarsano wax soo bartay oo haysta shahaadada kalkaalinimada caafimaadka dadweynaha. Kalkaaliyaha ogeysii xaaladaha caafimaad ee daba dheeraada sida neefta, sonkorowga, xanuunada suuxdinta, xasaasiyadaha daran ama dhacdooyinka kale ee caafimaad ee faragelin kara awooda canugaaga uu ku joogi karo ama kaga qayb qaadan karo dugsiga.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadaha iyo qawaaniinta caafimaad ee Degmada 196, booqo <https://www.district196.org/about/policies>

Tebi maqnaansho

Marka laga soo tago inaad si toos ah ula xiriirto dugsiga ilmahaaga, waxaad ka geli kartaa Campus Parent Portal > kadibna waxaad ku dhufan kartaa wax intaas ka badan liiska dhinacyada ku qoran > kadibna waxaad ku dhufan kartaa codsiyada dugsiga ka maqnaanshaha.

Macluumaadka meelaha lala xiriirayo xaaladdaha degdegga

Macluumaadka xaaladaha degdegga ayaa loo baahan yahay kahor inta uusan bilaaban sanad dugsiiyeed kasta waana in si degdeg ah loo cusbooneysiisaa wixii isbeddelo ah. Waa lagu soo ogeysiin doonaa marka ay dhacdo in canugaadu la kulmo shil ama jirro degdeg ah oo aan lagu talinayn in uu ku sii nagaado iskuulka. Waa mas'uuliyadaada ka waalid ahaan ama ka mas'uul ahaan inaad u qabanqaabiso daryeelka ku habboon canugaaga.

Macluumaadka qofka lala xiriiri karo markay ardaygu la kulmo xaalad degdeg ah waxaa lagu soo ururin doonaa Campus Parent Portal. Haddii ardayda kale ee dhigta District 196 ee ku nool gurigaaga aanan horey laguugu samayn akoonka Kambaaska, fadlan la xiriir dugsigaaga si aad u hesho lambarka lagu shaqageliyo Campus Parent Portal si aad u sameysato akoon. Marka aad hesho koodhka lagu gali karo, tallaabooyinka lagu samaysan karo akoonkaaga waxaa laga heli karaa barta <https://www.district196.org/community/families>

Baaritaanka jireed

Waxaa si adag loogu talinayaa in canug kasta lagu sameeyo baaritaan jireed 12 bilood gudahood ka hor inta uusan gelin dugsiga barbaarinta si loo ogaado waxna looga qabto wixii walaacyo caafimaad ah oo macluumaad cusub loo siiyo kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsigaaga. Waxaa lagugula talinayaa inaad ballan ku qabsato sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Tallaalada

Tallaalada waxay ardayda ka ilaaliyaan cudurada la isu gudbiyo ee dhallaanka; iyagoo sidaa daraadeed yareynaya jirrada, maqnaanshaha, iyo xaaladaha caafimaad ee joogtada ah ee saameyn kara awoodda uu wax ugu baranayo. Xeerka Minnesota 121A.15 wuxuu u baahan yahay in dhammaan ardayda dhigata dugsiga dadweynaha si buuxda uga tallaalan yihiin ama ay haystaan qoraal nootaayo ah oo ka reebaya tallaalada inta ay ka diiwaangashan yihiin dugsiga.

Waalidiinta/masuuliyiinta ayaa ka masuul ah inay diiwaano tallaal oo cusboonaysiisan siiyaan iskuulka canugooda. Kalkaaliyayaasha dugsiga waxay sidoo kale marin-u-heli karaan Xiriirka Xogta Tallaalka Minnesota (MIIC). MIIC waa nidaam gobolka oo dhan ah oo diiwaanada tallaalka elektarooniga ah u keydiya bixiyayaasha adeegga caafimaadka ee Minnesota iyo dadweynaha. Waxaa muhiim ah inaad la shaqayso kalkaaliyaha/kalkaalisada dugsiga si aad u ilaaliso u hoggaansanaanta tallaalka si waafaqsan shuruudaha Degmada 196 si aad ooga fogaato in canugaaga laga

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

cayriyo iskuulka.

Kheyraadka Tallaalka:

- Shuruudaha Degmada 196 ee tallaalkada ardayga waxaa laga heli karaa Xeerka 501.5AR: <https://www.district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/5015ar-student-immunizations>
- Foomka Tallaalka (buuxi dhinaca 2aad wixi ka reebitaano ah ee kor ku taxan): health.state.mn.us/people/immunize/basics/readyk12som.pdf
- Halka la iska tallaalo: <https://www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/vaxfinder.html>
- Rugaha Tallaalka Degmada Dakota: <https://www.co.dakota.mn.us/HealthFamily/HealthServices/ImmunizationClinics/Pages/default.aspx>
- Hel nootaayo (waxaa looga baahan yahay tallaalkada kadhanka ah caqiidadaada): <https://notary.sos.mn.gov/search/searchfornotary>

Goorhore yeelo caadooyin caafimaad qaba si aad u hubiso guusha ubadkaaga

Ku beeridda caadooyin iyo hab-nololeed caafimaad qaba (hurdo/nafaqo ku filan) iyo soo xaadiritaan joogto ah waxay xaqiijiyaan guusha ardayga ee iskuulka xiraa goorhore ilaa dugsiga barbaarinta. Waxaanu ognahay maqnaashiyaal/soo daahitaano badan, sababti ay noqotaba, ay u keeni karto carruurta inay dib u dhacaan tacliin ahaan iyo bulsho ahaanba.

Tilmaamaha in aad ilmahaaga u dirto iyo inkale iskuulka

Carruurta waa in ay joogaan guriga oo aysan imaan iskuulka sababaha soo socda dartood:

- Qandho ah 100.4 ama ka saraysa - canugga waxa uu soo laaban karaa marki aysan qandho qaban muddo 20 saacadood ah iyada oo aan la qaadan daawada qandho-jebinta.
- Xannuunka cunaha - canugga waxa uu soo laaban karaa 12 saacadood kadib marka uu qaato daawooyinka antibiyootigga oo aysan qandho qaban muddo 20 saacadood ah iyada oo aan la qaadan daawada qandho-jebinta.
- Matag ama shuban (iyada oo aysan jirin sabab la yaqaano) - canugga waxa uu soo laaban karaa 20 saacadood marka ay ka soo wareegto marki ugu dambaysay matag ama shuban.
- Finan (iyada oo aysan jirin sabab la yaqaano) oo leh isbedel dabeecad ama qandho ah 100.4 ama ka badan.
- Qufac xad dhaaf ah oo joogta ah oo adkeynaya in la dhigto iskuulka.
- Qabin caafimaad ku filan oo looga qeybqaato hawlaha caadiga ah ee dugsiga.

Degmo dugsiiyeedka ayaa raaci doonta tilmaamaha Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ee cudurada looga hortagi karo tallaalka (sida, jadeecada, bus-buska, xiiq-dheerta, iwm iyo COVID-19).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tilmaamaheena jirrada oo ay ku jiraan cudurka daafka iyo injirta madaxa waxaa laga heli karaa bogga webseedka ee Adeegyada Caafimaadka ee Degmada 196 barta

<https://www.district196.org/services/health-services>

Daawada

Kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga wuxuu daawo ku bixin doonaa dugsiga marka:

- Foomka dhammeystiran ee Oggolaanshaha in Daawo Lagu Siiyo Dugsiga [Habraaca Degmada 506.2.2.1P](#) oo uu saxiixay waalidka ama qofka masuulka ka ah ardayga loo geeyo kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga.
- Daawada lagu keeno dhaladi lagu soo qoray ama weelka asalka ah.

Kheyraadka Daawada:

- Habraaca Degmada 196 ee 506.2.2.1P: Oggolaanshaha in Daawo Lagu Siiyo Dugsiga:

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

<https://www.district196.org/about/policies/policy/%7Eboard/policies/post/506221p>

- Xeerka Degmada 196 ee 506.2.2AR: Oggolaanshaha Daawada iyo Helitaanka Adeegyada Caafimaadka ee Khadka Taleefanka Lagu Bixiyo: <https://www.district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/50622ar>

La xiriir kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsigaaga wixi isbeddelo ah oo ku yimaada dawada canugaaga, isbeddelada xaaladda caafimaad ama hab kasta oo caafimaad (sida, quudinta tuubada, antibiyootiga, tuubo-gelinta) ee loo baahan karo inta canugaagu uu joogo iskuulka.

Xasaasiyadaha cuntada

Fadlan ogeysii kalkaaliyaha caafimaad ee iskuulkaaga wixi xasaasiyado ah oo uu canugaagu qabo, gaar ahaan xasaasiyadaha halista ku ah nolosha, si ay kaala shaqeeyaan inaad hesho daawooyinka degdega ah ee lagu isticmaalayo iskuulka.

Inkastoo aanu waxyaabaha xasaasiyada kiciya ka ciribtiri karin iskuulka, kalkaaliyayaasheena caafimaadka waxay yarayn karaan khatarta iyo waxyeellada iyagoo la kaashanaya shaqaalaha si ay wax u baraan oo ay u abuuraan wacyigelin. Kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga wuxuu bixiyaa xog wuxuuna bixiyaa tababar ku aadan xasaasiyadda daran iyo daawada xaaladda degdegga ah ee canugaaga iyadoo ku saleysan baahida loo qabo in la ogaado iyadoo xogta iyo tababarka la siinayo shaqaalaha dugsiga ee dheeraadka ah sida macalimiinta, shaqaale hawleedka, darawalada basaska iyo shaqaalaha kale ee taageerada. Waa mid, si kastaba ha ahaatee, aad kuugu waxtar ah inaad sidoo kale la xiriirto macalimiinta canugaaga marka la joogo bilowga sanad dugsiyeed kasta si aad ugu wargeliso xasaasiyadda daran ee canugaaga ugana jawaabto wixi su'aalo gaar ah waxna ka qabato wixi walaacyo ah ee laga yaabo inay qabaan.

Badalaadaha cuntada ee macquulka ah ayaa la tixgeliyaa iyadoo loo eegayo kiisba-kiis ee ardayda loo arko inay qabaan naafo xaddidaysa cuntadooda. Dib-u-eeg Xeerka Degmada 196 710.2.4AR Codsiyada Beddelka Cuntada si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah barta: [district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/71024ar-meal-substitution-requests](https://www.district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/71024ar-meal-substitution-requests).

Bayaan beddelka cuntada oo gaar ah oo saxiixan waa inay buuxiyaan waalidka/masuulka iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka loona gudbiyaa kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga si loo tixgeliyo beddelka cuntada. Habraaca 710.2.4P Bayaanka Cuntada Gaarka ah waxaa laga heli karaa barta [district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/71024p-special-diet-statement](https://www.district196.org/about/policies/policy/~board/policies/post/71024p-special-diet-statement).

Qorshee inaad la kulanto kalkaaliyaha caafimaadka ee iskuulkaaga oo la xiriir Maareeyaha Adeegyada Nafaqada ee iskuulka canugaaga si aad ugala hadasho baahiyaha cunto ee gaarka ah ee canugaaga. Eeg xulashooyinka liiska cuntada ee ku habboon canugaaga.

Waalidiinta ay u joogaan carruur qaba walaac caafimaad:

- Xaqiiji in walaacyada caafimaad ee canugaaga aad la wadaagto dugsiga iyo kalkaaliyaha caafimaad ee dugsigooda.
- Isbar adiga iyo canugaaga kalkaaliyaha dugsiga.
- La shaqee kalkaaliyaha caafimaadka ee iskuulkaaga si aad u hesho dalabyo kasta oo ka socda bixiyaha daryeelka caafimaadka ama dukumiintiyaynta kale ee lagama maarmaanka ah.
- Macluumaadka xiriirka waalidka/mas'uulka ku cusboonaysii Barta Waalidka ee Campus Parent Portal.
- La socodsii kalkaaliyaha/kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka isbeddelo kasta oo ku yimaada xaaladda caafimaad ee canugaaga sida ugu dhakhsiyaha badan.

Liiska hubinta ee bilaabidda iskuulka

Dhammaan Waalidiinta iyo Ardayda:

- Xaqiiji in tallaalamadu yihiin kuwi ugu dambeeyey.
- Dib u eeg talooyinka nadaafadda si looga hortago faafitaanka caabuqyada (dhaq gacmaha oo ku qufac/hindhis xusulkaaga).
- Yeelo waqti jiif iyo waqti soo kicid si aad u xaqiijiso hurdo kugu filan oo joogto ah.
- Yeelo hab joogto ah oo loogu talagalay shaqada guriga iyo hawlaha dugsiga kadib ah.
- Maalin kasta ka quraaco guriga ama dugsiga.
- Ka caawi dookhashada dhar ku habboon, tusaale ahaan, xirashada kabo istareex ah oo nabdoon. Waxaan si adag uga digaynaa in dacas loo soo xirto iskuulka.
- Wada-xiriir furan la yeelo canugaaga si aad u xaqiijiso in ammaan uu ku yahay/tahay iskuulka. Haddii walaac yimaado, la xiriir macalinka ama maamulaha isla markiiba.
- Ku lug yeelo! Iska qor ururka waalidka (PTA/PTO), oo kalandarkaaga ku calaamadeyso dhacdooyinka sida habeen ku-noqoshada dugsiga iyo kulamada waalidka/macallimiinta.
- Codso barnaamijka dheefaha waxbarasho ee sanadlaha ah ee bilaabmaya Juulaay 15-keeda. Fadlan ogow in codsi cusub ay tahay in la gudbiyo sanad kasta, hal mid qoyskiiba. Booqo <https://paypams.com/OnlineApp.aspx> to apply. Haddii aad doorbidayso codsiga warqadda ah, waxaad mid ka heli kartaa xafiiska qaabilaada ee iskuulka canugaaga. Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan la xiriir Nutrition@district196.org ama wac 651-683-6959. Ardayda iyo qoysaska ayaa sidoo kale uqalmi kara qiimo-dhimista sheeyaasha hoos ku taxan, taasoo hoos u dhigaysa caqabadaha hortaagan kaqaybgalka fursadaha iyo barnaamijyada waxbarashada.
 - Qiimo-dhimista Khidmadda Qorshaha Difaaca iPad-ka
 - Qiimo-dhimista khidmadaha adeegga ee kharashka gaadiidka
 - Qiimo-dhimista khidmadaha kaqaybgalka ciyaaraha fudud
 - Qiimo-dhimista khidmadaha koorsada Waxbarashada Bulshada
 - Qiimo-dhimista khidmadaha imtixaanka tacliinta (ACT, AP, PSAT, SAT)
 - Qiimo-dhimista khidmadaha codsiga kulleejka
 - Maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay dugsigaaga
 - Maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay kordhinta helitaanka kheyraadka tignoolajiyadda
 - Dheefaha qoyska waxaa ku jiri kara khidmad ama khimado qiimo jaban oo loogu talagalay keebalka iyo adeegyada intarneedka

Adeegyada Nafaqada www.district196.org/services/food-and-nutrition-services

Waaxda Adeegyada Nafaqada waxay taageertaa horumarka aqooneed iyada oo ardayda siinaysa cunto nafaqo leh iyo adeeg macmiil oo heersare ah. Waxaan ognahay in ardayda ay awoodaan inay si ka sii wanaagsan wax u bartaan marka ay helaan cunto nafaqo leh!

- Lambarka Aqoonsiga Shakhsi Ahaaneed ee Guud (PIN). PIN-kan waxay lahaan doonaan ardayda fasalka K-12aad waxaana ujeedooyin badan looga isticmaali doonaa degmada dugsiga dhexdeeda; sida ku habaynta iPad-yada, maktabadda iyo baahiyaha gaadiidka.
- Dugsiyadu waxay isticmaalaan midkood kiiboodh si ay ardaydu u galiyaan PIN-kooda ama waxay ku iskaangareeyaan baarkoodhka ku yaalla kaarkooda Aqoonsiga Cuntada marka ay dooranayaan cuntadooda.

Kusoo dhawoow Dugsiga Barbaarinta 2026

- Dhammaan ardayda waxay uqalmaan inay iskuulka ku qaataan hal quraac iyo hal qado oo bilaash ah maalin kasta.
- Si aad u eegto liiska cuntooyinka iyo xogta kale fadlan booqo webseedkeena Adeegyada Nafaqada barta www.district196.org/services/food-and-nutrition-services

MAALINTA CAADIGA AH EE DUGSIGA BARBAARINTA

(6 saac iyo 20 daqiiqo)

Furitaanka/kulanka subixi Kor u

akhrinta isdhexgalka leh

Dhisidda luqadda, aqoonta asalka ah, fikradaha ku saabsan daabacaadda, xirfadaha aasaasiga ah & caadooyinka in la noqdo akhriste iyo qoraa

Dhisidda Aqoonta Akhris-Qoraalka

Dhisidda aqoonta aasaaska ah, ereyada, fahamka iyo xirfadaha dooda iyadoo loo marayo khibrado waxyaabo qoran oo hodan ah oo uu fududeeyo macalinka.

Qado iyo Nasiino Muusig/Jiim/Farshaxan

Xisaab

Dhisidda xirfadaha ardaygu ku fahmayo xisaabta

Sayniska iyo Cilmiga Bulshada

Si aad wax badan uga ogaato agabka manhajka, booqo

www.district196.org/academics/elementary


Qoritaanka Magaca Iyo Sahaminta Ereyada

Waxaan farnaa ardayda inay qoraan magacyadooda iyagoo ku blaabaya xaraf farta weyn ah xarfaha soo harayna ay ku qoraan farta yar. Ka caawinta ilmahaaga inay ku dhaqmaan xarafka farta weyn ee koowaad iyo xarfaha kale oo farta yar ah waxay noqon doontaa mid waxtar leh inta ay inay la qabsadaan qoraalka.

Macluumaadka dhijitaalka ah iyo tignoolajiyadda


Dhammaan ardayda dugsiga hoose waxay heli karaan iPad arday kasta uu kaligiis isticmaalayo. Tan waxaa loo isticmaalaa in lagu kordhiyo waxbarashada marmar inta lagu jiro maalinta dugsiga.

TIROOYINKA



Curr. Serv/Literacy/Handwriting/K1/Numbers
District 196 Graphics 8/30/2006

The Alphabet

Aa  apple	Bb  bat	Cc  cat
Dd  dog	Ee  edge	Ff  fish
Gg  gate	Hh  horse	Ii  itch
Jj  jump	Kk  kite	Ll  leaf
Mm  mouse	Nn  nest	Oo  octopus
Pp  pig	Qq  queen	Rr  rabbit
Ss  sun	Tt  turtle	Uu  up
Vv  volcano	Ww  wagon	Xx  fox
Yy  yo-yo	Zz  zebra	

Halbeegga Dhawaqyada & Barashada Ereyga Liiska Ereyada
Soo Noqnoqoshada badan leh ee Dugsiga Barbaarinta

I	like	the	and
see	is	a	to
was	with	of	my
they	you	for	are
by	from	all	love
now	what	said	only
here	how	when	into
do	don't	one	have



Guddiga Dugsiyada Degmada 196

Cory Johnson, Gudoomiye
Anna Williams, Gudoomiye Ku Xigeen
Robin Cerio, Karraaniga
Sakawdin Mohamed, Khasnaji
Catherine Diamond, Agaasime
Leah Gardner, Agaasime
Jackie Magnuson, Agaasime

Michael Bolsoni, Kormere Guud

Sida looga baahan yahay Title IX (Xeerka IX) iyo sharciyada kale ee midab kala sooc la'aanta gobolka iyo federaalka, Degmada 196 kuma takoorto xagga shaqada ama barnaamijyadeeda waxbarasho iyo waxqabadyadeeda, oo ay ku jiraan fursadaha xirfadeed, iyadoo lagu saleynayo jinsiga, jinsiyadda, diinta, midabka, caqiidada, asalka qaran, Xaaladda guurka, xaaladda qoyska, * naafonimo, xaalad la xiriirta kaalmada dadweynaha, jihada galmada, xubin ka noqoshada ama waxqabadka guddiga xuquuqda aadanaha ee maxalliga ah, * da'da ama macluumaadka hidaha. * Degmada 196 waxay siisaa fursad loo siman yahay kooxaha dhalinyarada ee loo qoondeeyay.

Agaasimaha Shaqaalaha, Joel Milteer (651-423-7859 – joel.milteer@district196.org) ayaa ah isuduwaha loo xilsaaray Title IX (Xeerka IX) waxaana kaloo loo xilsaaray inay ka jawaabto su'aalaha la xiriira shaqada ee ku aadan siyaasadaha kadhanka ah takoorka ee degmada. Agaasimaha Waxbarashada Dugsiga Hoose, Jeremy Sorenson (651-423-7782 – jeremy.sorenson@district196.org) iyo Agaasimaha Waxbarashada Dugsiga Sare, Eric Hansen (651-423-7712 – eric.hansen@district196.org) ayaa loo xilsaaray inay ka jawaabaan su'aalaha la xiriira ardayda ee ku aadan siyaasadaha kadhanka ah takoorka ee degmada. Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah, Janet Fimmen (651-423-7629 – janet.fimmen@district196.org) ayaa loo xilsaaray inay ka jawaabto su'aalaha la xiriira xuquuqda ardayda naafada ah. Cinwaanka boosta ee dhamaan agaasimayaasha waa 3455 153rd Street W, Rosemount, MN 55068. Su'aalaha Title IX sidoo kale waxaa loo gudbin karaa Kaaliyaha Xoghayaha Xafiiska Mareykanka ee Xuquuqda Madaniga (OCR).

*Qeybaha xidigta leh waxay ku kooban yihiin takoorka iyo dhibaataaynta ku aadan shaqada.